

NSW FIRE BRIGADES

AMMAANKA KIIMIKADA GURIGA

Fact Sheet 23 – Community Risk Management. Revised 1/11/2005.



XAQIIQ

Sannadkii 2001 waxaa jirey 4858 oo ah shillalka sumowga ee u baahday isbitaal dhigid oo ay dhibanayaashu ahaayeen carruur. Aasaaska ka hortaga shillalka carruurta ee Australia waxay ku soo warbixyeen in qiyaastii 50 carruur ah toddobaadkii isbitaalka la geeyo sumow dartii. Kiimikada looma isticmaalo weshadeynta oo keliya iyo wrshadaha waaweyn oo keliya, waa qayb ka mid ah nolol maalmeedka alaabta aan u isticmaalo nadiifinta jikooyinka, qolalaka qubeyska, dhar maydhida iyo sahamada, kontoroolka cayayaanka iyo nafaqeynta jardiinooyinka waa kiimiko sida ay yihiin rinjiga baabuurta iyo dhalaalinta alaabta guryaha, koloriintaberkada abaasha, betroolka, saliida matoorka, saliida bareega iyo LPG. Waxaa jira alaab badan oo guriga lagu isticmaalo oo aynaan u aqoonsaneyn kiimiko.

- Saabuunta, shaanbooga, udgoomisada, barafuunka, daawooyinka, sharoobooyinka qufaca iyo daawooyinka dhakhtarku qoro, fitamiinada, daaweynta dhirta, alaabta wax lagu nadiifiyo ee orgaanikada ah. Waa muhiim in si sax ah loo keydiyo oo loo isticmaalo kiimikada oo ah sida ku tilmaaman.

Kiimikada waxaa laga yaabaa inay yihiin sun mid guban karta ama si xoog leh u falgasha marka la qaso.

TALLOOYINKA ISTICMAALKA IYO U KEYDINTA KIIMIKADA SI AMMAAN AH.

Gurigaaga ammaan ka dhig! dabdemiska NSW wuxuu ku talinayaa liiskan ammaanka ee sahlan:

- ✓ **AKHRI WAXA KU QORAN** intaadan iibsan kiimiko kasta. Faham isticmaalka saxda ah iyo khatarta ay keeni karto kiimikadu.
- ✓ **DOORO** alaabta ugu khatarta yar oo kuu qabaneyso shaqada gaar ahaan haddii ay carruur joogaan.
- ✓ **KU XIR** kiimikada armaajo aysan carruurta gaari Karin. **KU KEYDI** kiimikada khatarta badan salka armaajada **XASUUSO** in carruurta ay jecel yihiin inay wax kasta ogaadaan, hindisaan iyo kuwo si fiican wax u fuuli kara.
- ✓ **RAAC** sameeyaha **TILMAAMIHISA**. **TAXADAR** badan sii markaad qaadeyso. isticmaal qalabka kaa ilaalinaya: galoofyada, ookiyaalaha ammaanka iwm. Hubi inuu leeyahay **MEEL UU HAWADA KA QAATO**.
- ✓ **DHAQ** maryaha wax lagu nadiifiyo isticmaalka ka dib iyo intaadan qashinka tuurin.
- ✓ **KU XIR** kiimikada weelkeeda asalka ah. **SI CAD** wax ugu qor weelkeeda
- ✓ **XASUUSO** in daawooyinka qaarkood u eg yihiin **CUNTO AMA CABITAAN** ka xaree carruurta.
- ✗ **HA QASIN** kiimikada
- ✗ **HA DIYAARIN** kiimiko ka badan intaad shaqada ugu baahan tahay
- ✗ **HA U ISTICMAALIN** kiimiko shaqooyinka aan loogu talagelin.
- ✗ **HA KU SHUBIN** kiimikada wasakh qaadaha, musqusha ama dhuunta wasakhda qaada.

FICIL

Ma **BAARTEY** meelaha aad ku keydiso kiimikadaada iyo weelka furkiisa dhawaan?

- Ma la xiriirtey Golaha Dawlada Hoose ee Xaafadaada si aad u **TUURTO** kiimiko gabowday ama mida soo hartey?

Eeg http://www.resource.nsw.gov.au/clean_out/chemical_collection.htm

- **RAAC** tilmaamaha gargaarka deg dega ah haddii maqaarka ama indhuhu ay gubtaan, haddii **LA LIQO** ama **LA CALAALIYO** qiiqueeda oo la **NEEF AHAAN LOO QAATO**- raadso daaweyn dhakhso ah.

- **XASUUSO** KHADKA MACLUUMAADKA SUNTA EE: 131 126

WIXII MACLUUMAAD AH EE DHEERAAD AH LA XIRIIR SALDHIGA DABDEMISKA NSW EE XAAFADAADA ama gal: www.fire.nsw.gov.au

GARGAARKA DEG DEGGA AH WAC 000